

Maxay tahay waxbarashada oo adkaataa?

Markii iskoolkaa ama waxbarashada ay dhibi ka jirto, waxa meesha yaalaa wuxuu yahay waxbarashadii ayaa ilmaha ku adkaatay.

WAXBARASHA OO ADKAATA waxaa loola jeedaa, in ilmaha in uu wax cusub bartaa ay tahay mid sida caaddiga ah ka gaabinaysa. Tusaale ahaan wax akhrinta iyo xisaabinta barashadooda ayaan u soconayn sida dadka kale ay u socoto.

Waxbarashada oo qof ku adkaataa waa wax guud oo caaddi ah. Addaygu wuxuu badanaa yahay mid lagu dhasho.

- Qofna isagu isuma keeno in waxbarashadu ku adkaato.
- Adayga u sabab maaha caajisloownimo ama doqoniino.
- Lama oran karo waa waxbarsho addayg, haddii wuxu yahay waxaan wali ardaygu baran ama luuqadda wax lagu barayo uusan si ku filan u aqoon.

Waxaa aad muhiim u ah in la ogyahay in ilmaha ay waxbarashadu ku addag tahay. Marka la ogyahay ayaa wax la bari karaa oo loo saacidi karaa qaabab kala duwan.

Yaad kala hadli kartaa haddii ilmahaaga waxbarashadu ku addag tahay?

| | |
|---------------------------------------|---|
| Ilmaha aan wali iskool gaarin: | Xanaanada caafimaadka ubadka, xanaanada ilmaha lagu hayo |
| Ilmaha iskoolka gaaray: | macalimadda, macalimadda isbishaaliistaha ah, saykolajiistaha iskoolka, kalkaalisada caafimaadka, dhakhtarka iskoolka |
| Dadka waaweyn: | macalimadda isbishaaliistaha ah ee iskoolka, dhakhtarkaaga xaafadda, ururada waxbarasha addayga- iyo jamciyadaha |

TUSAALAYAAL WAXBARASHADA OO ADKAATA

| | |
|--|---|
| <p>Akhrinta iyo qorida dhibaatooyinka la xiriira, dhibka akhrinta</p> <ul style="list-style-type: none"> • wax akhrintu waa gaabis ama khalad baa ku jira • qoritaanka khalad baa ku jira • wuxuu akhriyayo way ku addag tahay inuu fahmo • badanaaba waxaa ku addag inuu af qalaad barto | <p>Barashada xisaabta dhibaatooyinka la xiriira</p> <p>Waxaa tusaale ahaan ku addag</p> <ul style="list-style-type: none"> • inuu barto isu geeynta iyo isku dhufashada inuu madaxa ka xisaabiyo • inuu akhriyo oo fahmo tirooyinka waa weyn iyo ujeedada laga leeyahay inuu fahmo • inuu sentiimitirka mitir u baddalo |
|--|---|

WAXBARASHADA OO ADKAATA WAXAA LA XIRIIRI KARA DHIBAATOYINKAN SOO SOCDA

| | |
|--|--|
| <p>Dhibaatooyinka dhinacca luuqadda la xiriira</p> <p>Waxaa tusaale ahaan dhib ku ah</p> <ul style="list-style-type: none"> • inuu qofka hadlaya hadalkiisa la socdo • inuu fahmo jumladaha hadalka ee dhaadheer oo isku soo noqnoqonaya • inuu helo erayada saxda ah • inuu kalimaadka si sax ah u maqlo ama u oran karo | <p>Garashada waxa u muuqda dhibaatooyinka la xiriira</p> <p>Waxaa tusaale ahaan dhib ku ah</p> <ul style="list-style-type: none"> • inuu eego oo fahmo sawirada, sabuurada waxa ku qoran ama saacadda fahmo • dhulka ku cusub inuu garto halkii uu u socday • inuu waxa la barayo kala socdo sabuurada |
| <p>Dhibaatooyinka dhinacca xarakada jirkiisa la xiriira (matorikada)</p> <p>Matorikada weyn: inuusan hanan karin xarakaadka jirkiisa oo uu laclac yahay</p> <p>Tusaale ahaan</p> <ul style="list-style-type: none"> • inuu kufo markuu ciyaarayo • is dheeli tirkiisa oo ku addag inuu hanto | <p>Dhibaatooyinka dhinacca xarakada jirkiisa la xiriira (matorikada)</p> <p>Matorikada yaryar: isticmaalka gacantiisa</p> <p>Waxaa tusaale ahaan dhib ku ah</p> <ul style="list-style-type: none"> • inuu wax u sawiro ama u kalareeyo si sugan • inuu wax gacanta ugu qabto awood ku haboon ama sidii la rabay • inuu waxyaalaha yaryar u qabto si wanaagsan (sida, qabsashada qalinka, xirida xariga kabbaha) |
| <p>Dhibaatooyinka dhinacca sugnaanta la xiriira</p> <p>Waxaa dhib ku ah</p> <ul style="list-style-type: none"> • inuu wax dhug iyo niyad u soo jeediyo • inuu qorshaysto wuxuu qaban lahaa • inuu booskiisa fadhin karo • inuu koox la shaqeeyo • inuu wixii uu bilaabay dhammeeyo | <p>Dhibaatooyinka dhinacca xusuusta la xiriira</p> <p>Waxaa tusaale ahaan dhib ku ah</p> <ul style="list-style-type: none"> • inuu barto oo soo xasuusto erayada ku cusub • inuu xasuusto waxyaalaha dhaadheer ee loo sheego ama sheekooyinka dhaadheer ee uu maqlo • inuu barto waxa uu arkay, tusaale ahaan kaartada ama khariidadda iyo sawirada • inuu barto xarakaad taxane ah ama hawlgal shaqo oo soo noqnoqda |
| <p>Dhibaatooyinka waxbarasho oo iyagu baaxadda weyn leh</p> <p>Dhibkan waxaa la oran karaa wuxuu yimaada marka maadooyin fara badan ay barashadooda ilmaha ku addag tahay. Oo ay waliba taas u dheer tahay dhib la xiriira xagga saaxiibo yeelashada, iyo in dhib is dabiraada hawlo maalmeedka ahi uu jiro ama shaqaynta dhib ka haysto.</p> | |